

# Let's Beat the Bug!

## Macluumaaad ku saabsan Dhiqlaha

- Dhiqluhu waa cayayaan yar, oo leeg midhaha tufaaxa. Kuwa da'da wayn ama waalidku waa balaadh wareegsan oo midabkoodu yahay casaan cafeey xiga.
- Dhiqluhu wuxu quutaa dhiiga dadka wuxuna cuna la'aan ku noolaan karaa ilaa sanad. Inta badan dhiqluhu wuxuu soo baxaa habeenkii marka dadku hurdaan
- Waxa suurtagal ah in aan dadka qaarkood dareemin in dhiqle qaniiney.
- Hadii ay kula tahayin in dhiqle ama kutaani ku gashay, baadh oo ka raadi gogoshaada iyo meelaha la fadhiisto dhiqle, ama meel dhiig ku yaalo qaniinyadiisa kadib iyo xuubkiisa ama maqaar uu ka tegey.
- Waxakale oo aad ka raadisaa, furaashyada, sariirta biraheeda ama looxyada ay ka samaysantahay eek u wareegsan, gogosha ku goglan, meelaha dildilaacsan iyo meelaha dulleela ee dhulka iyo alaabtaba. Daaqadaha iyo albaabadu meelaha ay isaga yimaadaan ee iska qabsadaan iyo xataa dal daloolada korantada la geliyo.
- Ogoow dhiqlaha ama kutaantu waa wax yar oo blaadhan aad u dhaksobadan.

**Wixii faah faahin dheeraad ah ee aad u baahantahay kala xidhiidh**

**Numbarkan macluumaaadka dhiqlaha ee 612- 624-2200 ama 1855-644-2200**

**Ama booqo barta internetka ee  
bedbugs@umn.edu ama  
www.bedbugs.umn.edu**

## Shaqaalaynta Shirkada ladagaalanka Dhiqlaha

Sida ugu haboon ee aad isaga dabargoyn kartaa hadii dheqle aqalkaaga galo waa adiga oo u yeedha Shirkada ladagaalanka Dhiqlaha ee xirfada gaarka ah u leh sida loo xakameeyo dhiqlaha. Inta badan dadka iyaku iskood isugu daya inay dhiqlaha aqalkooda kala dagaalamaan inta badhan way ku guul daraystaan. Marka aad go'aansadid inaad shaqaalaysid shirkada ladagaalanka dhiqlaha, fadlan samee baadhitaan badan oo ku saabsan shirkadaha aad isleedahay u yeedho si aad ugala baxdid mida ugu fiican marka aad eegto macluumaaadka aad ururisay.

### Helida Shirkada Xirfadlaha La dagaalanka Dhiqlaha

**1.** Isticimaal oo ka baadh bogan "Helida Xirfadlaha"  
[www.pestworld.org](http://www.pestworld.org), oo ah boga lagu kaydiyo macluumaaadka iskaashiga ah ee ladagaalnaka dhiqlaha iyo cayayaanka.

**2.** Gobolka Minnesota, Shirkad kasta oo ah (PMP) waa inay shati sharci ah oo ay ku shaqayso ku leedahay wasaarada beeraha ee gobolkan (MDA) sidaas darteed macluumaaadka shirkad kasta oo ka shaqaysa MN boga wasaarada ayuu ku yaala oo aad ka helikartaa. Boqo boga wasaarada beeraha ee ah <http://www2.mda.state.mn.us/webapp/lis/pestappdefault.jsp>

**3.** Macluumaaadka sharkada ka eega buuga yellow pages ah adiga oo ka eegaya boga P'da kadibna "Pest"; warbixin dheeraad ah ka raadi dad kale oo hore ula macaamilay shirkadaas sida xaafadaha deriskaaga ah.



**Ka foojignoow  
shirkadaha  
kuwa**

- Aan sharciyasnayn ee u yimaada inay hawsha qabtaan iyaka oo aan isa soo sheegin islamarkaasina wata baabuur aan lahayn wax calaamad ah oo ku saabsan shirkadooda iyo waxay qabato.
- Isku daya inay kugu jujuubaan qandaraas aanad doonay inaad saxeexo
- Aan si fiican uga jawaabi Karin su'aalaha shirkadooda ku saabsan
- Kuwa isku daya inay aqalkaaga dawayn ku bilaabaan iyaka oo aan si fiican u baadhin oo ka hubin dhiqle.

# Let's Beat the Bug!

## Su'aalaha aad u baahnatahay inaad waydiisid shirkada aad u yeedhanaysid

Marka aad eeg eegaysid shirkada ladgaalanka cayayaanka, waxanu kugula talin lahayd inaad waydiisid su'aalahsan:

- Waydii inay ka sharchiyaysan yihiin wasaarada beeraha ee gobolka Minnesota.? Waydii inay ku tusaan sharcigooda inta aanay hawsha kuu bilaabin. Hadii aad gobol kale degantahay sidaas oo kale waydii inay sharciga ay ka haystaan wasaarada gobolkaasi ku tusaan. Waydii ina leeyihiin inshuuran bixin kara wixii dhibaato ah ee lama filaan ah sida liabilitiga.?
- Waydii inay shirkadani tahay mid xidhiidh la leh hayada iskaashiga ee loo yaqaan national Pest Management Association?
- Eeg hayada Better Business Bureau oo ah mid ururisa wixii dacwooyin iyo amaan ah ee laga sheego shirkad kasta oo ka shaqaysa dalka.
- Hubi mudada ay shirkadani shaqaynaysey si aadtaariikha xirfadooda u ogaatid.
- Mudo intee leeg ayay shirkada iyo shaqaalaheedu hawshan ku guda jireen? Waydii inay jiraan wax taba baro ah oo ay qaateen shaqaalahoodu iyo muda'da ka soo wareegtey markii ay qaateen taba baradaas ku saabsan habka loola dagaalamo cayayaanka.?
- Waa maxay nidaamka u degsan sida ay shirkadu ula dagaalanto dhiqlaha iyo cayaanka?
- Mudo intee leeg ayay qaadataa nadiifinta ama dabargoynta dhiqlahu?
- Waa maxay (xilka qof ahaan ku saarani) ama Masuuliyada kaa saran la dagaalanka dhiqlaha iyo cidhibtirkiisa?
- Waydii shaqaalaha la dagaalanka dhiqlaha PMP, in loo baahanyahay qorshe kale oo soo noqod ah kadib maalinta ugu horaysa ee ay aqalka buufiyaan?
- Hadii buufinta ama dawaynta aqalka uu la socdo buufis kululi, waydii shirkadu in ay isticimaash dawada kiimikada ah ee cayayaanka laysa iyo in kale?
- Waa maxay talaabooyinka muhiimka ah loo baahanyahay in la qaado inta ay hawshani socoto?

## Macluumaad dheeraad ah oo loo baahanyahay in la ogaado

- Daawaynta isticimaalka kiimikada cayayaan dilaha ee munaafacaadka lihi waxa ka koobantahay sadexdan talaabo: Kiimiko haraa ah oo ku hardha meeshii lagu nadiifiyeey ama lagu buufiyeey isla markaasina si dhakhso ah u shaqaysa oo u disha cayayaanka. Kiimiko gaadhi karta ama tiigsan karta cayayaanka iyo wixii wasakh ah. Nooc iyana lagaga tegi karo ama lagu dhejin karo meelaha ay ku dhuuntaan ee ka qarsoon dadka iyo meelaha uu dhaq dhaqaaqu ka jiro.

## Qeexida heshiiska Qandaraaska

- Marka aad go'aansatid shirkada hawl galba la dagaalanka dhiqlaha, si taxader leh isaga eeg oo isga akhri heshiiska aad la saxiixanaysid.
- Magaca shirkada iyo ciwaankooda ka hubu in uu ku yaalo waraaqaha heshiiska

# Let's Beat the Bug!

- Faah faahin wakhtiga ay shaqadu dhamaanayso
- Nooca Kiimikada la dagaalanka cayayaanka ee ay isticimaalayaan
- Talaabooyinka ama wixii adiga lagaaga baahanyahay inaad ku dhaqaaqdid ama sii qabatid
- Maalinta la bilaabayo hawsha iyo maalinta ay ku eegtahay ama xiliga soo noqod hadii loo baahdo
- Shatiga ama warqada sharciga shirkada iyo inshoranka ay bixiyaan
- Waxyaabaha ka gaarka ah ee aan ku jirin heshiiska ama sharciga shirkada iyo cancelashankeeda, balan ka bixida, qdobada dhexdhexaadinta hadii iska hor imaad yimaado iyo wixii balanqaad ama garantii ah ee ay bixiso shirkadu
- Iyo qiimaha

Hadii la isticimaalayo kiimikada sumaysa cayayaanka waxad shirkada waydiisataa in lagu siiyo waraaqo faahinaya nooca ay tahay iyo astaamaheeda. (MSDS) Shirkad shariyaysan oo hawshan qabataa waa in ay ku sii saa waraaqahan oo ay weliba la guud maraan kalayankooda ama macmiishooda oo waa talaabo ka mid ah qandaraaskooda.

## Udiyaargaroowga daawaynta

Inta aan la gaadhin maalinta daawaynta, waa samee wixii halwgal ah ee adiga dhankaaga looga baahanyahay ee shirkada PMP kuu dirto. Inaad qaado talaabooyinka lagaaga baahanyah oo dhami waxay lagama maar maan u tahay la dagaalanka iyo cidhib tirka dhiqlaha iyo guud ahaanba cayaankaan.

- Maydhida dharkaaga iyo gogoshaada
- Kala fududaynta wixii xafash ah oo aad dhulka ka qaadir
- Dayac tir oo samee wixii guriga ka jabab
- Ka qaad wixii alaab ah meelaha la marayo si aanay u xayirin shaqaalaha
- Ka gur wixii dhar ah khaanadaha, agagaarka sariiraha iyo kabadhada dharka
- Galal geli Furaashyada sariiraha

Kadib marka ay shaqaalahu dhameeyaan hawsha, la xidhiidh shirrkada, hadii ay jiraan wax wel wel ama su'aalo ah oo aad qabtid.

By Amelia Shindeler and Dr. Stephen Kells, 2012

Translated by Farhia M. Absie

Funding for "Let's Beat the Bug" Campaign provided by the United States Environmental Protection Agency and MDA. Additional assistance from the Minnesota Department of Health was greatly appreciated.

In accordance with the Americans with Disabilities Act, this information is available in alternative forms of communication upon request by calling 651/201-6000. TTY users can call the Minnesota Relay Service at 711 or 1-800-627-3529.



The University of Minnesota and MDA are equal opportunity educators and employers.